# SOTEPALA


**Daraasadda waxtarnimada adeegyada bulshada iyo caafimaadka ee carruurta jira da'da dugsiga**



Euroopan unionin rahoittama
NextGenerationEU

# Salaam!

Waxaanu nahay Sanna Salonen iyo Silja Kosola waxaana ka shaqaynaa gobolka samaqabka ee Länsi-Uusimaa. Waxaan sameyneynaa daraasad lagu magacaabo: Diirada-saarista adeegyada bulshada iyo caafimaadka carruurta jira da'da dugsiga, ama SOTEPALA. Ka sokow annaga, cilmi-baariyaal ka socda gobollada kale ee samaqabka ee Koonfurta Finland iyo Jaamacadda Helsinki iyo Jaamacadda Aalto ayaa sidoo ka shaqeynaya cilmi-baarista.




Ujeedada daraasaddan ayaa ah in la ogaado in carruurta u baahan taageero ee ku jira dugsiyada ay helayaan taageerada ay u baahan yihiin. Waxaan sidoo kale rabnaa inaan maqalno sida uu faa'iido u leeyahay xafiiska dhakhtarka dugsiga marka loo eego ra'yiga ardayda fasallada 5aad iyo 8aad.

Cilmi-baaristan waa muhiim sababtoo ah ma jiro dugsi ku yaala waddan kale oo leh daryeel caafimaad iyo la-taliye dugsi ama cilmi-nafsi yaqaan dugsi oo midkaan la mid ah. Qaar ka mid ah dadka waaweyn ayaa sidoo kale ka walaacsan sida adeegyadan taageerada loo agaasimay tan iyo markii la aasaasay degmooyinka samaqabka. Waxaan kaa codsaneynaa inaad ka qaybqaadato daraasadda, sababtoo ah carruurtu waxay xaq u leeyihiin in laga dhagaysto ra'yiga ay ka qabaan arrimaha iyaga khuseeya.

## Mutadawacnimada iyo xaquuqda diidmada

Sahanka SOTEPALA, ra'yigaaga ayaa muhiim noo ah. Ka-qaybqaadashadaada daraasaddu waa ikhtiyaari. Ka jawaabista sahanka waxay qaadanaysaa wakhti yar, laakiin adiga ayaa go'aansan kara sida saxda ah ee aad uga jawaabto su'aalaha furan.

Waad diidi kartaa inaad ka qaybqaadato ama waxaad joojin kartaa ka qaybqaadashada daraasadda haddii aad rabto. Kuma khasbanid inaad u sheegto cilmi-baarayaasha sababta aadan u rabin inaad ka qaybqaadato. Ma jiri doonto cawaaqib xun oo adiga ama dadka aad jeceshahay kala kulmi doontaan diidmada ama joojinta ka qaybqaadashada.

Euroopan unionin rahoittama NextGenerationEU




## Macluumaad ku saabsan daraasadda

Ka-qaybqaadashada daraasadda waxay ka dhigan tahay waxyaabaha soo socda:

- Side caadiga ah, waxaad ka qaybqaadataa baaritaanka caafimaadka ee fasalka 5aad ee dugsigaaga.
- Kulanka dhakhtarka dugsiga ka dib, waxaad heli doontaa koodka QR kaas oo aad kaga jawaabi karto sahanka. Ka jawaabista sahanka waxay qaadanaysaa 5-10 daqiiqo. Sahanku maaha imtixaan, mana jiraan jawaabo sax ah ama khalad ah.
- Waxaan ku waydiisanaynaa ogolaanshahaaga si aan isugu darno jawaabahaaga iyo macluumaadka ku saabsan ka maqnaanshaha dugsiga, baahida loo qabo taageerada dugsiga iyo haddii aad booqatay dhakhtarka ama cilmi-nafsi yaqaanka.

Dhammaan macluumaadka waxa loo kaydiyaa si aanay shisheeye u arkin. Anaga ka cilmi-baarayaal ahaan waanu tirtiri doonaa dhammaan xogta shakhsiyeed waxaana natiijada cilmi-baaristeena u daabici doonaa hab aan lagu aqoonsan karin adiga ama qof kale. Dhammaan agabyada cilmi-baarista waa la baabi'in doonaa dhammaadka 2030.

## Ilaalinta macluumaadkaaga

Sahanka SOTEPALA, waxaanu uruurinaa macluumaadka soo socda ee adiga kugu saabsan, tusaale ahaan: da'da, dugsiga, tirada ka maqnaanshaha dugsiga iyo inta jeer ee aad booqatay kalkaalisada caafimaadka dugsiga sanadka gudihiisa.

Macluumaadka adiga kugu saabsan waxaa loola dhaqmayaa si qarsoodi ah oo lagugu aqoonsan karin. Waxay taasi ka dhigan tahay in magacaaga iyo macluumaadka kale lagu kaydin doono meel kombayutarka ka mid ah oo lagu xirayo magaca isticmaalaha iyo baaswaadh oo lalama wadaagayo dadka kale. Cid aan ka ahayn cilmi-baarayaasha SOTEPALA ma arki doono jawaabahaaga iyo xogta loo uruuriyay daraasaddan. Cilmi-baarayaashu cidna uma sheegaan carruurta ka qayb-qaadatay daraasadda. Adiga ama carruurta kale qofna idin kama aqoonsan karo warbixinnada cilmi-baarista.



Daraasaddu waxay raacaysaa hab-raaca iyo xeerarka u degsan Jaamacadda Helsinki, Isbitaalka Degmada Helsinki iyo Uusimaa iyo gobollada samaqabka. Xogtaada waxaa lagu farsameeyaa gudaha Finland oo keliya oo dibadda looma gudbinayo.

## Natiijooyinka daraasadda

Warqad cilmiyeed ayaa laga qorayaa cilmi-baarista, taas oo macluumaadka cusub lagu wadaago. Lagaama aqoonsan karo qoraaladan.

Iyada oo la kaashanayo macluumaadka cusub, shaqada ay dhakhaatiirta ka qabtaan carruurta dugsiga iyo iskaashiga ka dhexeeya macalimiinta, kalkaaliyayaasha, dhakhaatiirta, la-taliyayaasha dugsiga iyo cilmi nafsi yaqaanada ayaa la wanaajin doonaa. Waxaa sidoo kale bandhigyo laga samaynayaa mowduucyada cilmi-baarista, si ay warbixintu ugu faafto qaybaha kale ee Finland.

**Waxaad xaq u leedahay inaad waydiiso su'aalo dheeraad ah ama iska hubiso macluumaadkaaga**

Waxaad daraasadda SOTEPALA naga weydiin kartaa wax kasta. Waxaad na weydiin kartaa ka hor ama ka dib markaad ka jawaabto sahanka.
Ciwaanka emailka Sanna: sanna.salonen@luvn.fi
Ciwaanka emailka Silja: silja.kosola@luvn.fi
Lambarka taleefanka ee Silja: +358 40 353 3758

Waxaad xaq u leedahay inaad hubiso ama saxdo macluumaadka aad bixisay. Waxaad sidoo kale ka noqon kartaa ka qaybqaadashadaada daraasadda adiga oo na ogeysiinaya. Macluumaad cusub ee adiga kugu saabsan lama uruurin doono markaas kadib, laakiin macluumaadka la ururiyey kahor wakhtiga joojinta ka qaybqaadashada lagama tirtiri doono agabyada cilmi-baarista.



# SOTEPALA

**Daraasadda waxtarnimada adeegyada caafimaadka**

Euroopan unionin rahoittama
NextGenerationEU

## Oggolaansho ka bixinta ka qaybqaadashada daraasadda

**Waxa la iga codsaday inaan ka qaybqaato daraasad: Beegsiga adeegyada bulshada iyo daryeelka caafimaadka ee carruurta jirta da'da dugsiga (Daraasadda SOTEPALA).**

**Waxaan helay xogta ku qoran warsidahan oo ah muuqaal iyo qoraal ahaanba, waanan fahmay wixii la ii sheegay. Waxaan cilmi-baarista ka ogahay in igu filan.**

**Waxaan fahamsanahay in ka-qaybqaadashada daraasaddan ay tahay ikhtiyaari. Waxaan xaq u leeyahay inaan joojiyo ka qaybqaadashada daraasadda wakhti kasta inta ay daraasaddu socoto. Khasab ma ahan in aan sheego sababta aan u joojinayo ka qaybqaadashada, taasina iima keenayso wax cawaaqib xumo ah.**

- ☐ **Haa, waan ka qaybqaadan doonaa daraasadda.**
- ☐ **Haa, jawaabahayga sahanka waxa lagu dari karaa xogtayda diiwaanka.**

Goobta iyo taariikhda:

---

Magaca:

---

Taariikhda dhalashada:

---

Saxeexa:

---